FAAHFAAHINTA SHIRKADDA

Somast

Somast waa shirkad cilmi-baaris oo dhisa xog, moodello iyo tababar luqadda Soomaaliga ah.

Dhawr xaqiiqo

Magac	Somast
Nooca shirkadda	Shirkad gaar loo leeyahay oo mas'uuliyaddeedu xaddidan tahay (LLC)
Magacu waxa uu u taagan yahay	Somali Science and Technology
La aasaasay	2023
Xarunta	Mogadishu, Somalia
Xooggeeda	Xog, moodello iyo waxbarasho luqadda Soomaaliga ah
Luqadaha	Soomaali iyo Ingiriis
Website	www.somast.so
Email	info@somast.so
Sharciga lagu xukumo	Federal Republic of Somalia
Diiwaangelin	44052647694, Somali Government
Cinwaan	Mogadishu, Somalia
Telefoon	+252619708582

Tirooyin

20M+ qof ayaa ku hadla Soomaaliga
Qiyaas ka dhex muuqata agabkayaga (Okt 1, 2026)

3 xog-ururin furan
Ku daabacan bogga xogaheenna (Okt 1, 2026)

1.1B+ tokens oo corpus ah
SomNLP corpus oo ka yimid 17 il (Seb 24, 2026)

5 kooxood bootcamp ah
La qabtay tan iyo Sebtembar 2025 (Okt 1, 2026)

200+ ka qalin-jabiyay bootcamp-ka
Dadka ka qaybqaatay koox (Okt 1, 2026)

269+ kaqeybgalayaal isha furan
Kaqeybgalayaasha GitHub ee gaarka ah ee kaydadkayaga oo dhan (Okt 14, 2026)

Waa kuma Somast

Soomaaliga waxaa ku hadla in ka badan 20 milyan oo qof, haddana si aad u yar ayuu ugu jiraa xogta tababarta AI-ga casriga ah. Somast waxay ururisaa oo daabacdaa qoraal iyo hadal Soomaali ah, waxay moodello Soomaali ah ku tababartaa, waxayna dadka baraysaa inay wax ku dhisaan. Shirkaddu waxay bilaabatay 2023, waxayna ka shaqeysaa Muqdisho.

Hadafkayaga

Kaabayaal AI oo luqadda Soomaaliga ah, la dhisay iyadoo lala shaqeynayo dadka ku hadla Soomaaliga.

Qiimayaasheena
La diiwaangeliyey oo la wadaagi karo: Xogta, faahfaahinta moodellada, iyo hababka qiimeynta waa la diiwaangeliyaa si kuwa kale u xaqiijiyaan oo ugu dhistaan sii-dayntayada.
Soomaali ayaa hogaamisa: Waxaa lala dhisay dadka ku hadla Soomaaliga, kuwaas oo qaabeeya tiknoolajiyada iyo jihadeeda.
Adag & soo noqnoqon kara: Cabbirro cad, habab la diiwaangeliyey, iyo natiijooyin kuwa kale soo saari karaan oo kordhin karaan.

Waxa aan sameyno

Xog
Corpus-yo qoraal iyo hadal Soomaali ah, leh ilo iyo shatiyo la xaqiijiyay.

Moodello
Tokenizer Soomaali ah, checkpoint-yo hadal-ilaa-qoraal ah iyo tijaabooyin turjumaad.

Waxbarasho
Bootcamp-yo la maalgeliyey iyo waddooyin barasho oo la hago, loogu talagalay injineerrada iyo falanqeeyayaasha Soomaaliga.

La-talin tignoolajiyo
Shaqo software iyo talo-bixin oo loo qabto hay'ado wada-shaqeeya, oo ay ku jiraan websaydhyo iyo app-yo mobilka.

Taariikhda

2023 Somast waa la aasaasay
Waxaa laga bilaabay Muqdisho si loo dhiso xogta, moodellada iyo qalabka ay Soomaaligu u baahan yahay AI.

2023 Soplang v1 waa la sii daayay
Sii deyntii ugu horreysay ee Soplang, luqad barnaamijyeyn oo leh syntax Soomaali ah.

2023 Waxbarasho furan ayaa la bilaabay
Waxaa la bilaabay in ardayda Soomaaliyeed YouTube kaga dhigo xogta, barnaamijyeynta iyo barashada mashiinka.

2024 Corpora furan oo ugu horreeya ayaa la sii daayay
Waxaa la daabacay xogtii ugu horreysay ee qoraalka iyo hadalka Soomaaliga oo hoos timaada shatiyo furan.

2024 Wada-shaqeyn ayaa la bilaabay
Waxaa la bilaabay shaqo wadajir ah oo lala yeesho hay'ado isticmaala ama taageera tiknoolajiyada luqadda Soomaaliga.

2025 Soplang v2 waa la sii daayay
Sii deyntii labaad ee ugu weyn ee Soplang, luqadda barnaamijyeynta ee syntax-ka Soomaaliga.

2025 Barnaamijyada kartida ayaa la bilaabay
Waxaa la bilaabay bootcamp-yo iyo fellowship-yo tababaraya injineerrada maxalliga ah ee ML iyo NLP.

2026 Adeegyada xogta iyo barashada mashiinka
Shaqo xog iyo barashada mashiinka oo loo habeeyay: waxaan diyaarinaa xogta, waxaanan dhisaa moodello ku habboon baahidaada.

Adeegyada

Dhis software
Waxaan u naqshadeynaa oo u dhisnaa hay'adaha Soomaaliya iyo meelo kale website-yo, web apps, apps mobile iyo

qalab gudaha ah.

Xog iyo AI
Xogtaada waxaan u beddelnaa warbixinno, dashboard-yo iyo moodello, waxaanan dhisnaa AI akhrisa, dhegaysata kana jawaabta Af-Soomaali.

Dayactir iyo taageero
Marka la bilaabo, waxaan ka dhigaynaa software-kaaga mid shaqeynaya, ammaan ah oo cusboonaysiinta ah, waanan hagaajinaa marka baahidaadu isbeddesho.

Hosting, domain iyo email waa ku jiraan
Inta aad heshiis dayactir nala leedahay, waxaan bixinaa domain-kaaga, hosting-ka iyo email-ka ganacsiga iyada oo aan lacag dheeraad ah laga qaadin.

Waddada horumarka

2026 Sii deynta SomNLP-Corpus
: Sii deynta buuxda ee corpus-kayaga qoraalka Soomaaliga, oo leh dukumeenti iyo shatiga ilo kasta.

2026 Sii deynta Soplang v3
: Sii deynta saddexaad ee ugu weyn ee Soplang, luqadda barnaamijyeynta ee syntax-ka Soomaaliga.

2027 Bilaabida hoggaaminta (mentorship)
: Barnaamij hoggaamin ah oo ardayda ku xira khabiirro khibrad leh.

Barnaamijyada

Bootcamp-ka Git & GitHub · Luulyo 2026
Xakameynta noocyada laga bilaabo mabaadi'da koowaad, commits, branching, isku-dhaca merge-ka, pull requests, iyo habka wada-shaqeynta ee bootcamp kasta oo kale uu filayo inaad horey u taqaan.

Bootcamp-ka DS & ML - Juun 2026 · Juun 2026
Koox Data Science iyo Machine Learning oo gacanta ku leh, xog-ururinno dhab ah, dhisidda moodellada, iyo mashaariicda capstone. Kooxdayada ugu weyn ee ilaa hadda.

Bootcamp-ka DS & ML - Feb 2026 · Febraayo 2026
Kooxdii labaad ee Data Science iyo Machine Learning. Waxaa la daboolay statistics, sklearn, aasaaska deep learning, iyo xog-ururinno Soomaali oo dhab ah.

Python Qof Kasta · Abriil 2026
Bootcamp Python bilow-ilaa-dhexe oo u furan qof kasta. Kaydkeenna ugu xiddigaha badan, xiddigo iyo forks ka yimid ardayda adduunka.

Bootcamp-ka DS & ML - Sep 2025 · Sebtembar 2025
Kooxdeenii ugu horraysay ee buuxda ee Data Science iyo Machine Learning. Waxay dhigtay aasaaska dhammaan barnaamijyada mustaqbalka, manhajka hadda arday badan ayaa isticmaala.

Hoggaaminta iyo kooxda

Ismail Ainte · Agaasimaha Guud
Hoggaaminaya istaraatiijiyadda, hawlaha, iyo koboca Somast.

Sharafdin Yusuf · Injineer & Cilmi-baare Madax
Hoggaaminaya naqshadeynta iyo horumarinta platform-yada teknoolojiyadda iyo cilmi-baarista Somast.

Omar Tood · Macallin Madax & Cilmi-baare
Pipelines xogta, moodello barashada mashiinka, iyo barnaamijyo tababar farsamo.

Salah Sharafdin · Horumariye Software
Dhisaya barnaamijyada webka, adeegyada isticmaalayaasha, iyo qalabka gudaha.

Wada-shaqeeyayaasha

Unkad: Wada-shaqeeye cilmi-baaris oo Somast.
Dugsiiye: Waxay maalgelisay bootcamp kasta oo Somast qabatay, dhamaantood furan qof kasta.
Memvid: Somast waxay ahayd injineerka software-ka isha furan ee ugu weyn ee Memvid.
Soplang: Mashruuc furan oo gooni ah oo hoos yimaada Somast: luqad barnaamijyeyn oo leh syntax Soomaali ah.
Docker: Waxay taageertaa Soplang, luqadda barnaamijyeynta ee furan ee syntax-ka Soomaaliga, iyada oo loo marayo barnaamijka Docker-Sponsored Open Source.
Skilful: Somast waa wada-shaqeeyaha tignoolajiyada Skilful, waxayna bixisaa la-talin iyo horumarinta software-ka.
Casri Store: Somast waa wada-shaqeyaha tignoolajiyada iyo la-taliyaha Casri Store, waxayna dhisay website-kiisa iyo app-ka mobilka.
Youth Connect: Somast waa wada-shaqeyaha tignoolajiyada iyo la-taliyaha Youth Connect, waxayna horumarisay website-kiisa.

Maalgelinta

Somast waxaa maalgeliya saddex nooc oo taageero ah.

- Maalgelin: Dugsiiye ayaa maalgelisay bootcamp kasta oo Somast qabatay, dhammaantoodna waa furan yihiin qof kasta.
- Shaqo macaamiil: la-talin tignoolajiyo iyo horumarinta software-ka ee hay'ado wada-shaqeeya.
- Taageero isha furan: Docker ayaa Soplang ku taageera barnaamijka Docker-Sponsored Open Source.

Xiriir

Saxaafad iyo guud: info@somast.so
Wada-shaqeyn: www.somast.so/so/become-partner
www.somast.so/so/company-profile